


29 Crown Street wuxuu qeyb ka yahay marxaladda xigta ee dib-u-dhiska dabaqyada dhaadheer

Dadka goobta degan waxba loogama baahna inay hada sameeyaan.

Laga bilaabo bartamaha sanadka 2026 ilaa bisha Febraayo ee sanadka 2028 waxaanu si dhow ula shaqeyn doonnaa dadka guryaha degan si aan u helno guri dabooli kara baahiyahooda, kuwaas oo ay ka mid yihiin guryo kaa agdhow.



Dabayaaqada sanadkan waxaan ku casuumi doonnaa dadka degan 29 Crown Street inay arkaan guryaha la dhammeystiray ee ku yaal Holland Court, Flemington



Kulamo lagula wadaagayo macluumaad dadka deegaanka, asxaabtooda iyo qoyskoodaba

Waxaan halkaan u joognaa inaanu si fool-ka-fool ah iyo qaab online ahba ula hadalno dadka degan 29 Crown Street, iyaga iyo asxaabtooda iyo qoyskoodaba. Waxaad eegtaa xaashiyaha iyo qoraalada lagu dhajiyay meelaha laga soo galo si aad u ogaato maalmaha iyo xilliyada la qabanayo kulamada ama booqo homes.vic.gov.au/events.

Nagu xirnoow




Si aad wax kasta ula socoto booqo:

homes.vic.gov.au/flemington-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi **Homes Victoria**



h v homes victoria

BIG HOUSING BUILD

Wixii kusoo cusboonaaday Bulshada **Flemington**

Waxa ka socda goobta

Rakibista qaboojiyeyaasha mudnaanta leh

ayaa wali la wadaa

Marxaladda xigta ee howlaha dib-u-dhiska ee laga wado 29 Crown Street

Dib-u-dhiska lagu sameynayo Melrose Street, North Melbourne iyo Ormond Street, Kensington ayaa wali socda

Dhismaha ku yaal Holland Court ayay howlo shaqo ka socotaa

Waxaa laga yaabaa inaad dareento shanqadho yaraaneysa markay shaqada gudaha guryaha laga bilaabo

Gurigii ugu horeeyay ee ku yaal Holland Court ayaa la dhameystiray



Iskaan garee QR koodhka si aad u aragto sifooyinka cusub

Maxaa ka jira Flemington

bisha Febraayo 2026



Holland Court:
286 guri oo cusub iyo barxad loogu talagalay dadweynaha

Shaqa ayaa goobta ka socota

- Qaab dhismeedkii dhismaha ayaa hadda la dhameystiray oo wiishashkii dhaadheeraana waa la qaaday
- Shaqa ayaa laga dhex bilaabayaa guryaha
- Hubinta tayada shaqada ayaa laga bilaabayaa guryihii ugu horreeyay
- Shaqa ayaa laga bilaabayaa barxadaha dadweynaha

12 Holland Court

Sugidda dhismayaasha

- Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
- Muunado yar oo laga qaadayo guryaha faaruqa ah, qolalka hortooda (corridors) iyo meelaha wiishka, iyo meelo kale oo la cayimay oo dibeda dhismaha ah
- Waxaad arki doontaa xoogaa isbeddel ah oo lagu sameeyay Holland Court iyo meelaha ka ag dhow inta aan isu diyaarneyno inaan guryaha la faaruqiyay ka saarno armaajooyinka, waxyaabaha dhulka saaran iyo waxyaabo kale oo yar-yar
- Meelo ku meel gaar ah ayaa shaqaalaha loo sameyn doonaa.
- Tiro yar oo baarkinnada baabuurta ah ayaa silig lagu wareejin doonaa si loo helo meel qashinka lagu qubo
- Haddii aad isticmaasho baarkinkan baabuurta la dhigto, fadlan la soco ogeysiisyada lasoo dhejiyo ee ku saabsan goorta loo baahan yahay in baabuurta meesha laga qaado

Debneys Park

Victoria Street

Holland Court

Racecourse Road

126 iyo 130 Racecourse Road

Howlo shaqa oo waxyaabaha korontada la xiriira

- Shaqooyin la xiriira korontada ayaa lasii wadi doonaa si ay u taageeraan dayactirka lagu sameynayo Nidaamyada Digniinaha Degdegga ah

Waxaa la sii wadi doonaa qabooyiyayaasha mudnaanta la siinayo ee lagu xirayo
126 Racecourse Road

Shaqooyin yar oo wadada laga hayo

- Isbeddello lagu sameynayo meelaha ay dadka ku lugeeyaan ee Holland Court
- Meelaha ay dadka ku lugeeyaan ayaa xidhnaan doonta muddo kooban
- Dadka baabuurta kala haga ayaa goobta ku sugnaan doona si ay u kala hagaan gawaarida iyo dadka lugeynaya

120 Racecourse Road

Sugidda dhismayaasha

- Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
- Muunado yar oo laga qaadayo guryaha faaruqa ah, qolalka hortooda (corridors) iyo meelaha wiishka, iyo meelo kale oo la cayimay oo dibeda dhismaha ah

Jadwalka shaqa ee howlaha dib-u-dhiska

12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road
Waxba lama burburin ah oo la sameyn doono ma jiri doonto inta ay dadku wali dhismooyinkan ku jiraan

2025

1. Barashada wax badan iyo ka dhigida wax kasta ammaan

- Sugidda guryaha bannaan
- Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si qalabka loogu maareeyo si amaan ah
- Joogtaynta dayactirka joogtada ah

2026: Waa nakan

2. Diyaargarowga

- ✓ Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- ✓ Hubinta isku xirka adeegga
- ✓ Dadka lugeynaya, baabuurta iyo baarkinnada baabuurta oo howlahooda ammaan laga dhigayo
- ✓ Dhismayaasha gudahooda ayaa waxaa laga hayaa shaqa si looga dhigo kuwo amaan ah
- ✓ Guryaha la faaruqiyay ayaa waxaa laga saarayaa armaajooyinka, waxyaabaha dhulka saaran iyo waxyaabo kale oo guryaha kujira

3. Duminta

- Rakibaadda biraha wax lagu dhisayo (scaffolding)
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada



Shaqada aan qabaneyno waxaa lagu hagaya saacadaha shaqada caadiga ah ee golahaaga:

Isniin ilaa Jimce
inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo
iyo 6-da fiidnimo

Sabti
inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo
iyo 3-da galabnimo

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah ha la xiriiraan xafiiska guriyeynta ee deegaankooda:

1300 360 462

ascotvale.housing@dffh.vic.gov.au



Mararka qaar waxaa loo baahan yahay in fasax laga helo golaha deegaanka si shaqada loo qabto wax ka baxsan saacadahan laakiin waan u sheegi doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.



Dhammaan howlaha shaqooyinka waxaa lagu fulin doona heerarka ugu sarreeya ee badbaadada iyo shuruudaha sharciga.



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo:
homes.vic.gov.au/information-in-your-language



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:
enquiries@homes.vic.gov.au